### Qolka Karlskrona

Waxaa laga heli karaa naqshadii iyo qaab dhismeydkii asalka ahaa ee magaalada Karlskrona. Magaalada waxaay aheyd meesha loo yaqaan Trösso, iminkana ka mid ah farasmagaalka Karlskrona. Trösa waxay aheyd jasiirad uu lahaa Andersson Vitus.
Markii uu didaay inuu ku wareejiyo dowladda waxaa la dhigaay xabsiga Karlsham, kadib Andersson Vitus wuxuu shegaay inay guban doonta magaalada. Waxaana dhaboobay saadaashiisa magaaladiina way gubatay dhamaan.

### Qabka sameynta xergaha

Waa qeyb ay yaalan qalab gacmeed kala duwan. Waxaana ka dhex muuqda rag saf saf uu taagan o gacmahoda ku soohaya xargaha waayo majirin mishiino soo saara xargaha. Maadaama maraakiibta ay ciidamada badda isticmaai jireenay ahaayen noocyada shiraaca. Sameynta qeybta hargaha muhiim bay aheyd.

### ” Kama maarmo afkeyga hooyo”

Waxaa ka qeyb qaatay soo diyaarinta mashruucan ah ” kama maarmo afkeyga hooyo” aardeyda dhigata Sunnadal skolan oo kala ah.Abdulrahman Said Ahmed, Abulrahman Abukar Ali, Majid Mohamed Hamid, Fathi Said Ahmed, Sahra Said Ahmed, Sahar Mohamed Hamid, Ida Swärdh, Annie Sandquist, Emma Hardlund, Alexandra Christensson, waa qeybo kamid ah qeybaha matxafka oo ay ardada soo xusheen waxaana gacan ka geystay oo caawiyey madaxa mashruuca Fredrik Karlsson iyo bare Abbas iyo farsamo yaqaan Åke Franzén




# MARINMUSEUM
## KARLSKRONA



**Ku soo dhawow**
**matxafka ciidanka badda**

**Soomaali somalisk**
**Bandhig, xusuus, waxqabad**



**Qolka Naqshadaha**


Boqorki la oran jireey Adolf Fredrik ayaa go’aamiyey in la keydio dhamman naqshadaha’(naamuuunadaha) doonyihii iyo maraakiibtii dagaalka ee warshadda so saari jirtey waayo majirin habkan casriga iminka la’isticmaalo oo ah sawridda naqshada inta aan la dhisin doonyaha iyo maraakiinta. Naamuunada hareerahoda waxaa taag taagan sanamyo laga qoraay qaarka mid ahaa raggii caanka ahaa ee dhisi jirey doonyaha iyo marakiibta waxaana ka dhex muuqda qaar ay garabka ugu xiran tahay calaamad cad. Calaamada waa calamad qarsoodi ah oo muujineysa ragga boqorka daacada uu ah.

**Qeybta qalabka quusayaasha**

Waa qeyb aay yaalan noocyo kala duwan ee qalabka quusayaasha aay isticmaali jireen. Wa qalab sida muuqata heerar kala duwan so maray, waxaase farsamo ahaan la hormriyey intii ka danbeysay dagaal weynihii 2 (labaad) ee dunida. Markii ugu horeysay isticmaalaan ciidanka baddaa ee Sweden waxay aheyd sanadki 1950 kii markii uu degay markabkii dagaalka ee la oran jireey Vasa.

**Godka hoose ( Tuuneel)**

Maadaama aan la dayactirin maraakiibtaa gabowda xilliyadii hore waxaay u badnaayeen inaay degan taasoo lagu arki burbur markab degay gudka hoose.





**Nolasha markabka**

Waxaay aheyd xilli yadii hore nolaal aad u adag marka loo eego nolasha maanta, tusaale ahan qeybta caafimaadka ee markabka waxaa ka muuqda askar lug kadhaawacmaay oo ay saaxiibadii garba duub u hayaan dhakhtarkiina miinshaar lukta kaga goynaya. Xirfada caafimaad waxaay aheyd mid aad uu hooseysa.

**Qeybta Hubka**

Waa qeyb aad uu balaaran oo aay yaalaan hubkii lagu dagaalami jireey noocyadiisa kala duwaan sida: Seefo, Banaadiiq, Baastolada iyo madaafiic.









**Albaabka Hore**

Marka la so galo ilinka hore ee matxafka dhanka midig waxaa kaaga muuqanaya farshaxan u ek geed timireed. Kaas oo ka sameysan banaadiiq(qoryo) baastoolado laysdul saarsay. Waa astaan ka tarjumeyso inuu yahay matxaf ciidan. farshaxankan wxaa logu tala galaay soo dhoweynta boqorkii Carl XV ee xiligaas booqanayey matxafka.